



XUQUUQAHA SHAQAALAHA SOO GALOOTIGA EE HOOS YIMAADA XEERKA XIRIIRKA SHAQAALAHA QARANKA

Iyadoo aan loo eegeyn heerka socdaalka, waxaad leedahay xuquuqaha lamidka ah sida uu dhigayo Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRA) iyadoo dhammaan shaqaalaha la ceymiyay oo ay ku jiraan xaqa ah:

- Abaabul urur shaqaale si aad ugala hadasho cidda aad u shaqayso oo kusaabsan mushaharkaaga, saacadahaaga, dheefahaaga, iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- Kala hadalka xaaladaha shaqada saaxiibadaada shaqada, dadweynaha, mise urur.
- Tallaabo la qaaddo saaxiibadaada shaqada si aad isugu daydo inaad hagaajiso xaaladaada shaqo.
- Dooro inaad sameyn wax kamid ah tallaabooyinkan.

In kastoo shaqo bixiyayaasha ay tahay inay adeecaan sharciyada socdaalka, haddii aad doorato inaad la hadasho mise tallaabo la qaaddo saaxiibadaada shaqada si aad u hagaajisid xaaladahaaga shaqo, waa sharci darro in shaqo bixiyayaasha ay kuu isticmaalaan sharciga socdaalkaaga.

Tusaale:

- Shaqo bixiyayaasha kuma hanjabi karaan inay wacaan ICE sabab ah awgeed inaad adiga iyo saaxiibadaada shaqada aad isku daydeen inaad ku biirtaan urur.
- Shaqo bixiyayaasha ma dalban karaan inaad soo saarto waraqadaha socdaalka oo cusub sabab ah awgeed inaad kala hadashay saaxiibadaada shaqada mise ururka xaaladaada shaqo.

Haddii aad aaminsantahay in shaqo bixiyahaaga uu kaa aargoostay, saaxiibadaada shaqada mise ururkaaga, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Xiriirka SHAQAALAHA Qaranka (NLRB) si aad dacwad u gudbisoo. NLRB waxay baari doontaa dacwadda, oo ay ku jiraan:

- Qaadashada dhaartaada iyo weydiinta caddayntaada. Sabab ah in NLRA kuu ilaalisay si la mid ah shaqaale kasta iyo sabab ah qofka xaaladiisa socdaalka kuma xirna in NLRA lagu xadgudbay, NLRB kuma weydiin doonto xaaladaada socdaalka mise xaalada socdaalka ee dadka kale inta lagu jiro Baaritaankooda mise dacwadda si loo caddeeyo xadgudubyada NLRA.
- NLRB waxay tallaabo sharci ah ka qaadi kartaa shaqo bixiyahaaga haddii caddayntu ay muujiso in shaqo bixiyahaagu si sharci darro ah u isticmaalayo sharcigaaga socdaalka si uu kuugu hanjabo mise kaaga aargoosto sabab ah inaad isticmaashay xuquuqahaaga hoos yimaada NLRA. NLRB waxa kaloo suurtagal ah inay la shaqeyso wakaaladaha kale si loo hubiyo in sharciyada socdaalka aan loo isticmaalin hanjabaad mise aargoosi shaqaale si ay u gutaan xuquuqdooda hoos timaada NLRA.
- Haddii shaqo bixiyahaagu ku cayriyey sabab ah inaad gudatay xuquuqdaada hoos timaada NLRA, NLRB waxay ka shaqayn doontaa sidaad dib ugu heli lahayd shaqadaada iyo in lagu siiyo mushaarkii kaa lumay. Balse haddii shaqa bixiyaha caddeeyo inaan lagu fasaxin inaad shaqeyso, NLRB kuma amri karto shaqa bixiyaha inuu ku siiyo mushaarka kaa lumay waxaana suurtagal ah inay dib kuugu soo celiso shaqadaada. Xaaladahaas sidaas ah, NLRB waxay raadin doontaa xal kale waxaana suurtagal ah inay la shaqeyso hay'adaha socdaalka si ay u caawiyaan shaqaalaha dhibanayaasha ah ee loo geystay xadgudubyada xuquuqaha shaqada. Tusaale, NLRB waxaa suurtagal ah inay tixgaliso inaad u qalmi karto fiisaha U mise T mise tallaabo dib loo dhigay oo laga yaabo inay la shaqeyso hay'adaha socdaalka si ay isugu dayaan oo ay u helaan gargaarkan.

**Kala xiriir NLRB: www.nlrb.gov,
1-844-762-NLRB (6572), mise soo dagso App-keenna
moobilka!**